PERSIMUNE
CENTRE OF EXCELLENCE FOR PERSONALISED MEDICINE OF INFECTIOUS COMPLICATIONS IN IMMUNE DEFICIENCY

REGION H · Rigshospitalet · Danmarks Grundforskningsfond · Danish National Research Foundation

Magaca iyo aqoonsiga shakhsiyeed lambarka ID. (qoraal)

# Ogalaanshaha in maadooyin bay-olaji la xiriira oo bukaanada laga qaado lagu kaydiyo Rigshospital.

Waalidka

Magaca: ________________________ Aqoonsiga shakhsiyeed Lambarka.:____________________

Waxaan aqbalay iyadoo qayb ka ah daawaynta ilmahayga ee Rigshospitalet, in tijaabooyin looga kaydiyo biyobanki. Mustqabalka, saamabalda waxaa loo isticmaali doonaa cilmibaadhisyo shaybaaareed oo si loo ogaado xiriirka ka dhexeeya caabuqyada iyo cudurada kaleba ee ku yimaadda dhaxalka, deegaanka, qaab noaleedka, - iyo jirada ilmahaygu qabo - waxaana loo isiticmaali doonaa doonaa warbixinta jirada/baarista ilmahayga.

Ujeedku waxaa weeye in la hagaajiyo baadhista iyo daawaynta bukaanada cudurkaaas oo kale qaba. Dhamaanba mashaariicda cilmi baadhista ee laga sameeyo biyobanki waa in ay ansixiyaan Gudiga Anshaxa Santifika waana in la ogaysiiyaa Maamulka Xogta, warbixinta ku saabsan jirada ilmahaagana, sida lagu qeexay qaybta sare, waxaa loogu dari donaa qaab aan lagu aqoonsan doonin ilmahaaga (haab aan lagu garan doonin).

---

Dhiigga, iyo maadooyinka kale ee bay-olaji iyo kaydka xogta waxaa loo kaydin karaa in mardanbe santifik ahaan loogu isticmaalo baadhista/nooca cudurka ee ilmahayga.

Haa ☐ Maya ☐

Haddii aan badalo maskaxdayda oo aan ogahay inaan la xiriir karo shaqalaahah Rigshospitalet oo aan heli karo bamfaleet ''Nudaada, ikhyaarkaaga'' (“Your tissue, your choice”) ee ay soo daabacday wasaaradda arimaha Gudaha iyo Caafimaadka, kuwaas oo bixinaya tilmaan ku saabsan kala noqoshada ogalaanshaha *iyadoo aan saamaynayn daawaytnaada wakhti xaadirkan iy tan mustaqbalka midna.*

Taariikh da: ______________________________ Sixiixa: ______________________________

Taariikh da: ______________________________ Sixiixa: ______________________________

Ogalaansahah waxaa qabtay: ______________________________________________

**Fadlan foomka oo buuxsan u dhiib shaqaalaah**

---

Warbixinta ku saabsan PERSIMUNE ayaa waxaa laga heli karaa CHIP, oo ah Rug Caafimaad oo Cudurada Caabuqa (Clinic for Infectious Diseases), Qaybta 2100, Righospitalet, Blegdamsvej 9, 2100 Copenhagen Ø. Telfoon.: 35455757 (inta u dhexaysa 9ka subaxnimo. - 3da galabnimo). Iimayl: persimune.rigshospitalet@regionh.dk

13. feebaraayo 2019

**Warbixinta waalidka: Daraasaddda waxtarka u leh bukaanada mustaqbalka**

Waxaan rabnaa inaan ku waydiino haddii aad jeclaan lahay inaad ilmahaaga u ogalaato inuu ku qaybgalo PERSIMUNE biyobank si loogu isticmaalo cilmbaadhis mustaqbalka ah oo ku aadan difaaca caabuqa.

Anagu hadaan nahay Rigshospitalet waxaan aas-aasnay biyobank halkaasoo maadooyinka bay-ollajiga ee bukaanada lagu kaydiyo. Maadooyinku waxay ka koobanyihiin saambalo dhiig iyo candhuuf iyo saxaro kuwaasoo hadhow loo isticmaali doono mashaariic cilmibaadhis oo looga gol-leeyahay soo saarista cuduro ay qabaan bukaanka khatar wayn ugu jira inuu ku dhaco caabuq ama horeyba u qaaday caabuq khatar ah.

Maadada bay-olajiga waxaabaadhi doona baare shaybaarka qaabilsan isagoo diiradda saaraya ilmaha laftiisa (hidaha, barootiinka iyo waxyaalaha kale ee metabooligga ah) iyo noolayaasha ilma aragtayda ah (bakteeriyada iyo fayrisyada) ee ku jira maadooyinka. Tani waxay keeni dontaa culmi cusub oo ku saabsan habka difaaca iyo nooca caabuqa. Xogta kasoo baxda baadhiganadan cusub waxaa lala xiriirn doonaa warbixninta ku jirta kaydka qoralaada daawaynta ilmahaaga si ay usuuragasho insida ugu wanaagsan loo fasiro natiijooyinka.

Maadooyinka bay-olaji ee ilmahaagu ugu deeqo PERSIMUNE biyobanki ayaa sidaa owgeed muhiim u ah shaqada lagu soo saarayo baadhi iyo daawayn cusub oo ay helaan bukaanada mustaqbalka. Laakiin ka qaybgalka biyobanki saamayn kuma yeelan doonto daawaynta ilamahaaga.

Saambalada dhiigga ee loogu talagalay PERSIMUNE biyobanki waxaa isla wakhtigaas lala qaadaa saamblo dhiig oo kale iyadoo qayb ka ah daawaynta sidaas darteedna ma jiraan saliingayaal dheeri ah. Cadadka dhiigga ah ee la qaadayo wuxuu ku jaango-anyahay da-da iilmaha wax dhib ahna kuma kenayo caafimaadka:

- **Niyonatal**: Dhiigga waxaa lagu qaadaa tuubada dhiig(1 x 350 µl iyo dhibco dhiig ah oo waraaqa lagu dhibciyo)
- **1-12 bilood**: Dhiigga waxaa lagu qaadaa laba tuubo (2 x 2 ml)
- **1-5 sano:** Dhiigga waxaa lagu qaadaa laba tuubo (1 x 9 ml iyo 1x 3 ml)
- **Wixii kawayn 15 sano:** Dhiigga waxaa lagu qaadaa sadex tuubo (2 x 9 ml iyo 1x 3 ml)

Saambalka dhiigga - iyo candhuufta iyo saxarada - waxaa loo qaadaa iyadoo waafaqsan ogalaanshaha la bxiyay, 3-6 bilood kadibna sanadkiiba mara, ilaa iyo inta ay sii socoto daawaynta ilmahaaga ee Rigshospitalet.

Baadhitaanad shaybaarka iyo boroosees marinta natiijooyinka waxaa lagu samayn doonaa Rigshospitalet ama waxaa lagu samayn doonaa xarumaha dadwayanaha ee aan bah-wadaagta nahay ee wadamada EU.

Waxaan ku diiwaangalinaa oo aan ku kaydiniaa saambalada ansixinta Maamulka Xogta (Data Inspectorate's), macluumaadka shakhsiyeedna gabi ahaanba sir ahaan ayaan u qarinaa. Ka hor inta aan saambalada biyobanki loo isticmaalin mashaariicda cilmibaadhista, mashruuc kasta oo cilmibaadhiseed waa in ay ansixiyaan Gudiga Anshaxa Santifigga (Scientific Ethics Committee) iyo Maamulka Xogta (Data Inspectorate).

Inaad ilmahaaga u ogalaato ka qaybgalka waa mid ikhyaari ah, oo markaas sinaba uma saamaynayso daawaynta wakhti xaadirkan ama tan mustqabalka ee ilmahaaga. Haddii aad dooroato inaad ilmahaaga u ogalaato inuu ka qaybgalo oo aad hadana maskaxdaada badasho, fadlan xaqiiji in go'aankaaga laga diiwaangaliyo Diiwaanka Isticmaalka Nudda. Sidan waxaad samayn kartaa adoo buuxinaya foomka ''Nudahaada, ikhyaarkaaga'' (“Your tissue, your choice”), kaas oo ay tahay inaad u dirto Diiwaanka Gudiga Qaranka Caafimaadka ee Isticmaalka Nudda (National Board of Health's Registry for Use of Tissue). Haddii aad in arinkan lagaa caawiyo u baahantahay, la xiriir shaqaalaha rugta ama Xarunta PERSIMUNE.

*Waad ku mahadsantahay* wakhtiga aad ku bixisay akhrinta warbixintan iyo tixgalinta arinka biyobanki.

Waxaan ku waydiin doonaa inaad go'aansato inaad noo ogalaato inaan kaydino saambalada laga qaado ilmahaaga ee PERSIMUNE biyobanki adiga o sixiixaya warqadda ***Ogalaanshaha kaydinta maadada bay-olajiga ee bukaanka ee Rigshospitalet.***

Mahadsanid,

Shaqaalaha PERSIMUNE

Warbixinta ku saabsan PERSIMUNE ayaa waxaa laga heli karaa CHIP, oo ah Rug Caafimaad oo Cudurada Caabuqa (Clinic for Infectious Diseases), Qaybta 2100, Righospitalet, Blegdamsvej 9, 2100 Copenhagen Ø. Telfoon.: 35455757 (inta u dhexaysa 9ka subaxnimo. - 3da galabnimo). Iimayl: persimune.rigshospitalet@regionh.dk